Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta Rasmiga ah

الرسمية الجريدة

Official Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 OCTOBER 2023** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

## APRIL - OCTOBER

# 2023

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 06/04/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.124

XEERKA: SIYAASADDA QARAN EE QURBA-JOOGTA SOOMAALIYEED

XRW - BIXIT
08 APR 2023
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.28.04.23 ee 06/04/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Qurba-joogta Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda ay leeyadahay in la meel-mariyo Siyaasadda Qaran ee Qurba Joogta Soomaaliyeed

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.28.04.23 ee 06/04/2023,** kuna saabsan ansixinta **Siyaadadda Qaran ee Qurba Joogta Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah loo igmaday fulinta iyo meel-marinta Siyaadadda Qaran ee Qurba Joogta Soomaaliyeed.

**Qodobka 3aad**

Xeerka Siyaadadda Qaran ee Qurba Joogta Soomaaliyeed, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-064-23
TAARIIKH: 12-04-2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga

**SIYAASADDA QARAN EE QURBAJOOGTA SOOMAALIYEED 2023**

## Tusmo

Liiska xarfaha la soo gaabiyay ........ 4
Hordhac........ 4

*1. SOO KOOBID GUUD........ 6*

UJEEDOOYINKA SIYAASADDA........ 7

MABAADIIDA HAGAYSA SIYAASADDA........ 8

1. 1 HORDHAC IYO GOGOLXAAR ........ 9

1.2 MAANGALNIMO/MACQUULNIMO........ 10

*2.WAXA UGU WANAAGSAN EE LAGA BARAN KARO XIRIIRKA QURBAJOOGTA ........ 11*

2.1 WADASHAQAYNTA QURBAJOOGTA........ 11

2.2 CAQABADAHA UGU WAAWEYN........ 11

3.LAFAGURKA XAALADDA QURBAJOOGTA EE TAAGAN........ 11

3.1 ISBADDALLADA IYO XAALADDA TAAGAN........ 12

3.2 MUUQAALKA GUUD EE SOOMAALIDA QURBAJOOGTA AH........ 13

3.3 URURRADA QURBAJOOGTA AH........ 15

*4. DHINACYADA SIYAASADDU AWOODDA SAARAYSO ........ 15*

4.1 MAAMULKA........ 15

4.2 KA QAYB QAADASHADA ,SIYAASADDA, MAAMULKA IYO GANACSIGA........ 16

4.3 XOGTA IYO WARBIXINTA........ 17

4.4BADQABKA IYO AMMAANKA........ 19

4.5 MUDNAAN SIINTA HAWEENKA ........ 20

4.6 DHALLINYARADA........ 21

4.7DALXIISKA IYO DHAQANKA ........ 22

4.8 ISDHEXGALKA IYO DIB-USOO LAABASHADA QURBAJOOGTA........ 24

4.9 CAAFIMAADKA........ 25

4.10 WAXBARASHADA ........ 27

*5. GABAGABO ........ 28*

*5.1 Mudnaanta Siyaasadda ee muddada gaaban ........ 28*

*5.1.1 Samaynta iyo Xoojinta xiriirka qurbajoogta ........ 28*

*5.1.2 Qeexidda shabakadaha gudaha, kooxaha iyo ururrada........ 28*

*5.1.3 Qorshaynta istiraatijiyad wada xiriir hagaagsan........ 28*

*5.1.4 Qorshaynta qaybaha iskaashiga qurbajoogta........ 29*

*5.1.5 Baahinta Siyaasadda……………………………………………………………………………………………………29*

*5.2 Mudnaanta Siyaasadda Muddada dheer……………………………………………………………………………….29*
*5.2.1 Maalgashiga tooska ah ee qurbajoogta……………………………………………………………………………..29*
*5.2.2 Hababka isgaarsiinta……………………………………………………………………………………………………30*
*5.2.3 Gudbinta Waxbarashada……………………………………………………………………………………………..30*
*5.2.4 Gudbinta Xirfadaha……………………………………………………………………………………………………30*
*5.2.5 Ganacsiga iyo Dalxiiska………………………………………………………………………………………………31*

## List of Acronyms

| Name | Acronym |
| --- | --- |
| Diaspora and Emergency Action & Coordination (DEMAC) | DEMAC |
| The Department of Diaspora Affairs | DODA |
| Eastern and the Horn of Africa | EHOA |
| Gender-Based Analysis | GBA |
| Gross Domestic Product | GDP |
| Gulf Cooperation Council | GCC |
| Information and Communication Technology | ICT |
| International Organization for Migration | IOM |
| Microfinance Institution | MFI |
| Migration for Development in Africa | MIDA |
| Ministry of Foreign Affairs and international Cooperation | MOFAIC |
| National Development Plan | NDP |
| Small and Medium [scale] Enterprises | SMEs |
| United Nations Population Fund | UNPF |

**Fariinta Wasiirka**



Siyaasaddani waa tii ugu horaysay ee Qurbajoogta Soomaaliyeed, waxaana looga golleeyahay in ay abuurto xiriir wanaagsan oo faa'iido u leh Soomaaliya iyo Qurbajoogteeda, iyadoo laga duulayo ujeeddada awoodsiinta qurbajoogta si ay uga qayb qaataan hormarka dalka.

Haddaba siyaasadu, waxay diiradda saaraysaa sidii loo horumarin lahaa loona ballaarin lahaa awoodda Soomaalida faraha badan ee qurbajoogta ah iyo sidii ay kaalin mug leh uga qaadan lahaayeen isbeddelka dhaqan-dhaqaale ee dalka, una heli lahaayeen taageerada iyo is garabtaaga ay uga bahaan yihiin gudaha dalkooda.

Soomaalida qurbajoogta ahi mar walba waxay qayb ka yihiin hormarka dalkooda. Sanado badan ka dib, qaarkood waxay awood u yeesheen in ay iskood isu abaabulaan una samaystaan ururro bulsho, laakiin maqnaanta barnaamijyo rasmi ah ayaa keentay in hal-abuurkoodu noqdo mid yar oo aan joogto ahayn, si rasmi ahna ula falgalin qorshayaasha iyo istiraatijiyada horumarineed ee dalka.

Sidaas darteed waddanku wuxuu ku seegay fursadado badan si uu uga faa'iidaysto waxtarka qurbajoogta. Hadaba, waxaa la samayn doonaa ururro leh ujeedooyin cad cad kuwaas oo awood u siinaya qurbajoogta in ay ka qayb qaataan hormarinta dalka.

Siyaasaddani waa fariin ku wajahan qurbajoogta Soomaaliyeed iyadoo aan loo eegayn da'da, jinsiga, dabaqadda dhaqaale iyo heerka aqooneed si ay qayb uga noqdaan isbeddelka bulsho iyo midka dhaqaale ee Soomaaliya. Siyaasaddani diiradda saari mayso kaalinta qurbajoogta ee dalkooda oo qura ee waxay ballaarinaysaa adeegga dowladda ee mawaadiniinteeda qurbajoogta ah. Dowladda waxaa ka go'an in ay samayso siyaasad lagula macaamilayo qurbajoogta oo guulaysata iyo taageeridda hirgalinteeda.

**Mudane Abshir Cumar Jaamac**

**Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.**

# 1. Soo Koobid Guud

Waxaa aysan su'aali ka taagnayn in aragtida socdaalka iyo qurbajoogta ay xiriir dhow la leedahay horumarka waddamada martigaliyaayaasha ah iyo waddamada asalka ah ee qurbajoogta. Soomaalida qurbajoogta ah waxay bixiyeen taageero ay u fidiyeen qoysaskooda xilliyadii colaadaha sokeeye socdeen iyo wixii ka dambeeyay. Sidoo kale, waxa ay door ka qaataan horumarrada gargaarka bini'aadamnimo si guud iyo si shaqsi ahba, maaddaama ay qurbajoogtu door fiican ku leedahay maamulka iyo siyaasadda ee waddamada martigaliyey.

Dowladda Federalka ah ee Soomaaliya waxaa ka go'an mudnaansiinta iyo la macaamilka muwaadiniinteeda qurbajoogta ah si ay uga qayb qaataan horumarinta dalka si walba oo macquul noqon karta. Dowladdu waxay aqoonsan tahay doorka qurbajoogtu ay ku leedahay dhisidda nabadda, deeqaha dhaqaale ee qurbajoogtu ay ku caawiyaan bulshadooda, adkaysiga dhaqaale ee qoysaska, gudbinta aqoonta, maalgashiga, hal-abuurka ganacsiga iyo shaqa-abuurka.

Ayagoo kaashanaya adeegyada teknolojiyadda iyo xiriirka, degaannada ay ku nool yihiin qurbajoogtu waxa ay heer fiican ka gaareen Dalka martigaliyay iyo sidoo kale dalkooda asalka ah. Waxaa xusid mudan in dowlado badan ay daahfureen siyaasado iyo istiraatijiyado lagu qeexay doorka qurbajoogtu ka qaadan karaan horumarinta dhaqaale ee dalkooda asalka ah, ayagoo aan si toos ah dalkooda dib ugu soo laaban, balse shaqooyinkaas oo dhan ay qabteen ayagoo ku maqan dalka dibaddiisa. Intaas waxaa dheer in wax ka badal lagu sameeyo nidaamka socdaalka uu fududayn karo kor-u-qaadidda isdhexgalka iyo la macaamilka qurbajoogta.

Shaqooyinka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ayay ka mid tahay la macaamilka qurbajoogta Soomaalida ah kuwa ku nool dibadda iyo gudaha dalka, sida uu mudnaanta siinayo nuqulka "Siyaasadda Arrimaha Dibadda 2015" sidaas daraadeed, 2013 ayaa la aasaasay Waaxda Arrimaha Qurbajoogta ee Wasaaradda Arrimaha Dibaddu si ay wadashaqayn iyo macaamil ula yeelato qurbajoogta, uguna xirto ururrada bulshooyinka qurbajoogta ah, safaaradaha Soomaaliya ee dalka dibaddiisa.

Intaas waxaa dheer, siyaasaddani waxa ay waddada u xaaraysaa in si sharciyeysan ah loola macaamilo qurbajoogta Soomaalida ayadoo ay arrimahaas hoggaaminayso Waaxda Qurbajoogta ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo guud ahaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayadoo kaashanaysa wasaaradaha kale, bulshada rayidka ah si ay qayb uga qaataan

ballaarinta awooddooda ka qaybqaadasho, isdhaafsiga dhaqaalaha sida ay ka rajaynayso dowladdu islamarkaasna ay heli doonaan gunnooyin lagu dhiirrigalinayo.

Nuqulsiyaasadeedkan waxaa ku cad ujeeddada siyaasadda, habraaca iyo mabaa'diida siyaasadda iyo sidoo kale ujeeddooyinka dhow iyo kuwa fog ee ay higsanayso siyaasaddu.

**Ujeeddooyinka Siyaasadda**

In la horumariyo siyaasad lagula macaamilayo qurbajoogta waxay muhiim u tahay horumarka Dalka, Dhaqaalaha, Siyaasadda, Taariikhda soojireenka ee qurbajoogta dalka, abaabulka qurbajoogta, tirada qurbajoogta, degaannada ay kala joogaan iyo khayraadka qurbajoogta. Barnaamijyo badan oo ay qabteen qurba joogta ayaa guul dhow iyo mid fogba laga gaaray, inkastoo saamaynta dhaqaaale ee barnaamijyadaas ay yaraayeen.

Ugu dambayntii, waddamada ku guulaystay istiraatijiyadda iyo siyasadda qurbajoogtooda waa kuwa fuliyay siyaasadda qurbajoogtooda. Waxaa jira waddamo badan oo bogaadiyay muhiimadda la macaamilka iyo xiriirka qurbajoogtooda, halka kuwo kale ay ku guul daraysteen hirgalinta siyaasad macna weyn oo ay kula macaamilaan qurbajoogtooda.

**Ujeeddooyinka guud ee Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta waa:**

In la hubiyo in Dowladda Federalka samayso iskuxir dhexe oo lagu kormeerayo dadaallada qurbajoogtu ay doonayaan in ay uga qaybqaataan horumarinta dalka ayagoo u sii maraya hal-abuur u fududayn kara ka qaybqaadashadooda horumarka dalka.

In la hirgaliyo lana horumariyo siyaasad lagu dhiirrigalinayo qurbajoogta si ay uga qayb qaataan horumarka dalka.

In la horumariyo lana hirgaliyo siyaasad xoojinaysa wacyiga qurbajoogta iyo ka qaybgalkooda horumarrada qaranka.

In la abuuro madal dhexe iyo xogkaydiye lagu aruuriyo xogaha qurbajoogta, barnaamijyadooda iyo fursadaha maalgashi si loo ogaado doorka qurbajoogta ee horumarrada qaranka.

In la horumariyo iskaashiga u dhexeeya wasaaradaha Dowladda Federalka si kor loogu qaado doorka qurbajoogta.

In la horumariyo siyaasado iyo barnaamijyo lagu taageerayo dib-u-soonoqoshada iyo isdhexgalka qurbajoogta gudaha dalka.

Safaraadaha iyo qunsiliyadaha Soomaaliya ee dibadda in loo sameeyo siyaasado wacyigalin iyo isdhexgal bulsheed.

**Mabaa'diida hagaysa siyaasadda**

Siyaasaddani waxay ku salaysan tahay mabaadii'da hoos ku xusan:

B). In la aqoonsado doorka muhiimka ah ee qurbajoogta Soomaaliyeed ku leeyihiin horumarka dhaqandhaqaale ee dalka iyo baahida loo qabo in la mideeyo dadaallada lagula xiriirayo qurbajoogta.

T). Xiriirka iyo wadashaqaynta la la yeelanayo qurbajoogta in lagu soo daro Hirgalinta, Kormeerka iyo Qiimaynta barnaamijyada qurbajoogta si loo fududeeyo in waqtigeeda lagu hirgaliyo Siyaasadda Qaran ee Qurba joogta.

J). Kormeerka siyaasadda waxa ka mid ah habab lagu kormeerayo dhammaan shaqooyinka la xiirira qurbajoogta Soomaalida ayadoo loo sii marayo maamulka dhexe ee Dowladda iyo Waaxda Arrimaha Qurbajoogta si meesha looga saaro shaqooyin soo laalaabta ama laba jeer la qabto.

X). Arrimaha haweenka, qaabdhismeedka Siyaasadda in lagu soo daro fursado taageeraya haweenka.

Kh). Dhallinyarada, ayadoo la eegayo tirada dhallinyarada Soomaaliyeed, hay'adda Qaramada Midoobay ee UNPF waxa ay ku qiyaastay dhallinyaradu in ay katahay boqolkiiba toddobaatan iyo shan 75% marka loo eego guud ahaan bulshada inteeda kale, sidaas daraadeed siyaasaddani waxa ay taageeraysaa bulshada dhallinyarada ah.


D). Islaxisaabtanku wuxuu hagi doonaa dhammaan mabaa'diida saamilayda qurbajoogta ah si loo hirgaliyo siyaasaddani iyo barnaamijyada qurbajoogta. Dhammaan saamilayda waxaa laga rajaynayaa in ay raacaan hannaanka ugu fiican ee Dowlad wanaagga.

R). Siyaasadda loo dhan yahay, waa qayb muhiim ah oo ka mid ah siyaasaddan, ayadoo la la xiriirayo dhammaan saamilayda iyo qurbajoogta si ay qayb uga qaataan horumarinta wadahadal dhex mara ayadoo aan loo eegayn; jinsi, da', awood, caafimmaad, afkaar siyaasadeed ama dabaqad dhaqaale.

### 1. 1 Hordhac iyo Gogol-xaar

Hormarinta Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta waxay ahayd barnaamij Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga uga gollahayd isku xirka Qurbajoogta iyo dowladda si ay qayb uga qaataan horumarrada waqtiga dhow iyo waqtiga fog ee Soomaaliya. Hay'adda Socdaalka Qaramada Midoobay (IOM) ayaa bixisay taageero farsamo oo muhiim u ahayd looguna baahnaa dhamaystirka siyaasaddan. Wasaaradda Arrimaha Dibaddu waxay dadaal dheer u gashay in ay hoggaamiso dhisidda xiriirka u dhexeeya Qurbajoogta iyo Dalkooda Soomaaliya.

Wadatashiyo ayaa la sameeyay lana hirgaliyay si loo soo saaro qabyo qoraalka koowaad ee siyaaadda. Kulan loo dhan yahay ayaa sidoo kale la qabtay si loo helo qaybta iyo fikirka ay siyaasaddan ku darsanayaan Maamulka Gobolka Banaadir, Maamulgoboleedyada, ururrada qurba joogta iyo madaxda jaaliyadaha Yurub, Afrika iyo Aasiya Intaas waxaa dheer, in la qabtay laba wadatashi oo loo qabtay haweenka ku nool gudaha iyo dibadda si loo hubiyo qaybta haweenka ee hagaysa siyaasadda. Habka wadatashigu wuxuu ahaa mid fududaynaya sahaminayana wada shaqaynta Maamulgoboleedyada ayadoo la aqoonsan yahay muhiimadda doorka haweenka Soomaaliyeed ee horumar waara.




*Jaantuska 1$_{aad}$ ee Soomaalida Qurbajoogta ah ee dibadda (SomaliNet)*

Siyaasaddan, Wasaaradda Arrimaha Dibadda Waaxdeeda Arrimaha Qurbajoogta waxay hagaajin doontaa, xoojinna doontaa dadaallada si ay u midayso dhaqdhaaqyada iyo iskuxirka dalladaha qurbajoogta si ay uga qayb qaataan dib-u-dhiska dalka. Dadaallada ay waaxdu waddo waxay ku salaysan yihiin aragti ah "u baddalidda socdaalka hormar waara" maaddaama socdaalka iyo qurbajoogtu ay yihiin awood dhalin karta hormar waara oo ay gaaraan dadka iyo bulshooyinkooda ka soo hayaamay dalkooda asalka ah iyo dalalka martigaliya labadaba. Siyaasaddu waxay waddada u xaaraysaa saamaynta istitraatijiyad wadaxiriir oo awood u siinaysa in macaamil fiican la la yeesho qurbajoogta.

**Qaybaha wadaxiriirku ka kooban yahay**

Ayadoo loo sii marayo iskuxirka hababka wadaxiriirka, siyaasadan waxay qurbajoogta ku dhiirrigalinaysaa una soo jiidaysaa in qurbajoogta Soomaaliyeed ka qaybqaato horumarka iyo dib-u- soo kabashada dalka. Istiraatijiyad wadaxiriir waxa ay ka caawin kartaa wada hadallada la la yeelanayo qurbajoogta Soomaaliyeed, iyo ururrada maalgashi. Tani waxa ay siinaysa hage caawinaya Wasaaradda Arrrimaha Dibadda, danjirayaasha Soomaaliyeed iyo wakiillada dibadda marka ay jeedinayaan barnaamijyada la xiriira arrimaha qurbajoogta ayagoo u sii maraya xogaha lagu soo bandhigo wadaxiriirka dowladda iyo qurbajoogta.

## 1.2 Maangalnimo (Rational)

Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020-2024 wuxuu aqoonsan yahay awoodda qurbajoogta Soomaalida ee horumarinta dalka. Siyaasaddan waxay midaynaysaa shaqooyinka ay ka mid yihiin qaabdhismeed muhiim ah kaas oo la hirgalin doono laguna sixi doono khaladkii taarikhiga ahaa ee Qurbajoogta Soomaalida ka hor istaagay in ay wax ku soo kordhiyaan horumarka dalkooda. Intaas waxaa dheer, Soomaalida Qurbajoogta ah waa kuwo danaynaya dalkooda ayna ka go'an tahay in ay dunida kale uga gudbiyaan sawir iyo warbixin fiican si ay ugu dhiirrigaliyaan in ajaanibtu dalxiis u yimaadaan dalka, ka qayb qaataan hormarinta dhaqandhaqaale, ku lugyeeshaan maalgashiga gudaha, dhaqanka, sidoo kale ay noqdaan safiirro wanaagsan oo matala dalka.
Taageerada Qurbojoogta Soomaalida ee dalka waa mid soo jireen ah oo ay ku caawinayeen bulsho badan iyo qoysas aad baahi ugu qabay. Waxaa jiray abaabullo lagu samaynayo qurbajoogta sanadihii dambe. Soomaali badan oo qurbajoog ah ayaa sameeyay mashaariic lagu sameeyay dhaqaale aruurin

sida dhismayaal dugsi, dhismayaal xarumo daryeelka hooyada iyo dhallaanka, halka ururro iskood isku abaabulay ay sidoo kale fuliyeen mashaariic gargaar degdeg ah lagu gaarsiinayo dad tabaalaysan. Sidoo kale, ururrada haweenka ee Yurub iyo Waqooyiga America ayaa gacan ka gaystay caawinta dadka ay saameeyeen abaaruhu. Xirfadlayaasha caafimaadka ee qurbajoogta Soomaalida ah ayaa si la mid ah iskood isku abaabulay si ay ugu tabarrucaan adeeg iyo qalab caafimaad oo lagula tacaalayo saf-marka Covid 19. Soomaali badan ayaa bogaadisay dadeelladan naf badbaadinta ah.
Waaxda Arrimaha Qurbajoogta ee Wasaaradda Arimaha Dibadda waxay qaadatay door firfircoon si ay u hoggaamiso horumarinta Siyaasadda Qaran ee Qurba joogta. Waaxda waxaa loo aasaasay kormeerka, abaabulka iyo midaynta ururrada qurbajoogta iyo horumarinta qaabdhismeedka guud oo iskuxiraya qurbajoogta.

## 2. Waxa ugu wanaagsan ee laga baran karo xiriirka qurbajoogta

### 2.1 Wadashaqaynta Qurbajoogta

Waxaa jira cashar muhiim ah iyo habraac laga baran karo hal-abuurro ay sameeyeen waddamo xiriir iyo macaamil la leh qurbajoogtooda. Qodobka ugu muhiimsan casharkaas waxaa uu yahay wadashaqayn la la yeeshay qurbajoogta ayadoo loo sii marayo golayaal ay ku midaysan yihiin kuwaas oo qurbajoogtu ay ku lug leedahay ayagoo ka aasaasay siyaasado iyo istiratijiyado. Habkani wuxuu u saamaxayaa in ay siyaasaddu guulaysato, maaddaama qurbajoogtu u taagan tahay mid ka mid ah ururrada saamilayda ee ugu saamaynta badan uguna muhiimsan.

### 2.2 Caqabadaha ugu waaweyn

Dhisidda iskaashi u dhexeeya Dowladda iyo qurbajoogta waxay u badan tahay in uu guulaysto haddii ay jiraan istixgalin weyn oo dhidibbadu u aasan yihiin, wax wada qabsi, xiriir fiican iyo is-aaminaad. Waddamo badan qurbajoogtu waxay u arkaan dalkooda asalka ah in uu u arko il dhaqaale bixisa oo aan dhammaan, halka waddamo kale oo ah waddama asalka ah ee qurba joogta ay u arkaan qurba joogtooda kuwo muhiim ah oo loo baahan yahay. Haddaba, labada dhinacba waa in ay dareemaan in dhisidda kalsooni ay tahay arrin muhiim u ah la macaamilka qurba joogta iyo siyaasaddan.


Intaas waxaa dheer, in dadka ku nool gudaha dalka ay badanaa fikir khaldan ka haystaan qurbajoogta marka ay dib ugu soo laabanayaan dalka, sidaas

darteedna siyaasaddu ay qayb ka qaadato ilaalinta qurbajoogta. Qabiillada kala duwan ee Soomaalida, dadka la hayb soco iyo dhinacyada siyaasadda waa in ay qayb ka yihiin Siyaasadda Qurbajoogta.

## 3. Falanqaynta Xaaladda Qurbajoogta ee taagan

### 3.1 Isbaddallada iyo Kororka Qurbajoogta

Qurbajoogta Soomaalidu waxay taariikh u leedahay hayaanka (migration) Galbeedka, Geeska Afrika iyo ka shishe, ayagoo qarniyo kala duwan hayaamayay. Hayaankii sanadihii 1987-1991 waxaa sababay dagaalladii sokeeye ee dalka ka qarxay, xasillooni la'aanta siyaasadeed iyo dhibaatada degaanka ee noqotay isbaddalka cimillada.




Jaantus2: Qiyaasta Soomaalida deggan meel ka baxsan bariga iyo Geeska Afrika. Bulshooyinka Soomaalida ee deggan Denmark, Filand, Norway iyo Sweden. Sidoo kale, Netherlands, Italy, iyo Germany.

Dagaalka sokeeye kaliya wuxuu barakiciyey lixdii qofba qof ka mida bulshada Soomaaliyeed. Sanadihii u dhexeeyay 1990-2015, tirada dadka Soomaaliyeed ee ku koray qurbaha 850,000 ilaa iyo 2 million ayay gaartay. Inkastoo barakaca ugu weyn uu keenay dagaalkii sokeeyo haddana, waxaa jira arrimo kale oo saamayn ku leh in hijro dhacdo waxaana ka mid ah shaqo la'aanta baahsan, yaraanta fursadaha dhaqaale ee dhallinyaradu heli karayaan.

Hay'adda Qaramada Midoobay ee Dhaqaalaha iyo Arrimaha bulshada ayaa sheegtay in 45,000 oo Soomaali ah ay sanadkii hayaamaan, intii uu socday caabuqii safmarka, sanadihii ugu dambeeyayna uu socday hayaankaas. Bar ka mid ah tirada kor ku xusanna ay noqtay qoxooti sanadihii u dambeeyey.

Qowmiyadda Soomaaliyeed waxaa laga helaa Jabuuti, Itoobiya iyo Kiinya, kuwaas oo xiriir wada dhalasho uu kala dhexeeyo Soomaalida ku nool

Jamhuuriyadda. Xogta ku saabsan tirada qurbajoogta dibadda ku maqan waa mid aan fadhin sanadihii ugu dambeeyey. Si kasta oo ay ahaato, Soomaalida qurbajoogta ah ee bariga iyo geeska Afrika deggan waxay ahaayeen 90% waxayna ku soo dheceen 65% . Tirada rasmiga ah ee bulshada Soomaaliyeed ee deggan waddamada Carabta, 500,000 oo ka mida waxay deggan yihiin Yaman kaliya, halka 200,000 oo kalana ay ku nool yihiin waddamada iskaashiga Golaha Gacanka Carbeed (GCC states). Fursadaha dhaqaale ee gobolkaas, iyo baahida dadka soo hayaamaya ayaa gacankaas ka dhigay meel dhaqaale ahaan loo soo hayaamo sanadihii dambe. Soomaalida qurbajoogta ah ee ku nool meel ka baxsan bariga iyo geeska Afrika waxay u badan yihiin Yurub iyo Ameerika. Yurub Soomaalidu waxay u badan yihiin boqortooyada Ingiriiska waxayna ku nool 110,000 (UK), Jarmalka waxaa ku nool (152,000), midowyga Yurub guud ahaan waxaa ku nool Soomaali lagu qiyaasay 100,000.

Ameerika qurbajoogta ku nool waxaa lagu qiyaasay 170,000 waana dalka labaad ee Soomaalida ugu badan ee qurbajoogta ah ay ku nooshahay. 1990 tiradu waxay kor uga kacday 3,000 ilaa iyo 150,000 sanadkii 2015. Sidoo kale Soomaali gaaraysa 50,000 ilaa 70,000 ayaa ku nool koofur Africa. Kanada waxaa ku nool (62,000), Ustaraaliya  (20,000). Tiradan waa tii ugu dambaysay marka la isku daro, faracii koowaad, kii labaad iyo kii saddexaad ee Soomaalida qurbaha gashay. Waxaa loo baahan yahay dadaalo si loola macaamilo Soomaalidaan qurbajoogta ah ee ku kala nool waddamo kala duwan si loo hirgaliyo Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta.

### 3.2 Muuqaalka (Profile) Qurbajoogta Soomaaliyeed

Qurbajoogta Soomaliyeed waa kuwo sameeya dhaqdhaaq, waxa ay door fiican mar hore ku yeesheen horumarinta dhaqanka iyo dhaqandhaqaalaha dalkooda. Waxaa loo baahnaan doonaa tirakoob lagu ogaanayo muuqaalka (Profile) guud ee qurbajoogta ayadoo loo eegayo qaybaha sida; waddamada ay ku nool yihiin ee martigaliyay, waxbarashada, shaqooyinka, da'da  (rag iyo dumar). La macaamilka qurbajoogta Yurub iyo Waqooyiga Ameerika waa mid shaqadiisa lagu jiro waxaana loo baahan doonaa in la ogaado saamaynta cudurkii safmarka ahaa Coved-19 uu ku yeeshay dhaqaalahooda.

Sida lagu sheegay warbixin sahan maalgashi oo ku saabsan qurbajoogta Soomaalida ayna soo saartay hay'adda caalamiga ah ee Horumarinta Sanduuqa Beeraha (IFAD), waxaa jira baahi badan oo qurbajoogtu u qabto in ay maalgashadaan dalka, haddana saddex meelood meel ayaa la sheegay in ay tahay maalgashadayaal. Tusaale ahaan, dadka ka soo hayaamay dhulka

saxaraha Afrika ka hooseeya soona galay Ameerika ayaa wajahaya saboolnimo sare marka loo eego dadka kale ee soo hayaamay 6. Marka laga soo tago caqabadahaan, bulshooyinkaan waxay u dhow yihiin in ay dalka maalgashadaan haddii khataraha iyo caqabadaha dalka ka jira hoos u dhacaan.

Sahankan waxaa lagu sheegay in boqolkiiba 80% qurbajoogta Soomaaliyeed ay caawiyaan qoysaskooda iyo saaxiibbadood si bille ah, ayna ka bixiyaan kharashaadka cuntada, waxbarshada iyo adeegyada caafimaad2. Sida la hubo lacagahaas waxay cadayn u yihiin maalgashiyada socda ee dhaqaalaha iyo bulshada kuwaas oo mar horaba qurbajoogtu ku samaysay dalka Soomaaliya. Ka hor Covid19 cadadka lacagaha qurbajoogta Soomaaliyeed gudaha dalka u soo diraaan wuxuu ahaa qiyaastii $475.00 qofkiiba sanadkii. Intaas wixii ka dambeeyay lacagaha qurbajoogtu soo dirto waxay noqdeen qiyaastii $190.00 waxayna hoos u dheceen lixdan boqolkiiba 61%3. Waxaa xusid mudan, in lacagaha qurbajoogtu soo dirto aysan marna istaagin dakhliga qoysaska Soomaaliyeedna ay ka tahay boqolkiiba 50 ama 60%.

Sanduuqa lacagta adduunka (IMF) ayaa ku qiyaasay boqolkiiba 25% dakhliga guud ee dalka (GDP) in ay tahay lacagaha qurbajoogtu soo diraan. Lacagaha xawiladaha looga soo diray qurbaha sanadkii 2020, qiyaastii waxay gaareen 1.75 Bilyan Doolar, inkastoo laga yaabo in tiradu intaas ka badato marka loo eego ilo wareedyada kala duwan4.

Degganaan la'aanta siyaasadeed iyo xaddiga sare ee shaqo la'aanta dhallinyarada ee bariga iyo geeska Afrika ayaa keenay hayaanka ku salaysan nolol iyo dhaqaale raadin. Arrintaan waxay uga sii dartay markii dad badan u hayaameen waddamada Golaha Iskaashiga Gacanka Carbeed iyo koonfurta Afrika. Hay'adda Qaramada Midoobay ee IOM ayaa soo saartay in korarka hayaanku uu keenayo dhaqaale yari. Aaminsanaanta helid dhaqaale fiican, fursado faa'iido leh in laga helayo dalalka loo hayaamay. Xiriirka dhaqandhaqaale ee xooggan kana dhexeeya bulshooyinka qurbajoogta ah wuxuu kaalin ka gaystay in qurbajoogtu wax tar ka gaystaan dalkooda ayagoo u sii maraya lacagaha lagu soo diro xawilaadaha, dhammaan arrimahaan in lagu soo daro qaab dhismeedka siyaasadda waxay muhiim u noqon doontaa in siyaasaddu si guul ah ku hirgasho.

### 3.3 Ururrada Qurbajoogta

Ururrada qurbajoogta waxay muhiim u yihiin in qurbajoogtu waxqabad ku soo kordhiyaan Soomaaliya. Ururradan waa kuwo u shaqeeya si rasmi ah (sida ururrada Dowladda u diiwaan gashan) iyo si aan rasmi ahayn labadaba. Qurbajoogta Soomaaliyeed waxay ku kala duwan yihiin awoodahooda shaqo, laakiin waxay ka midaysan yihiin in ay dhammaantood ka wada shaqeeyaan caafimaadka, waxbarashada, kaabayaasha dhaqaale, arrimaha bulshada, ganacsiga, siyaasadda iyo u qareemidda. Tusaale ahaan, Denmark kaliya oo ay ku nooshahay 16-21,000 Soomaali ah, 80 urur oo qurbajoog ah ayaa jira sida la xaqiijiyey ka hor safmarkii (COVID19) 5. Hay'adda qurbajoogta, gargaarada degdegga ah iyo iskuxirka ee (Diaspora and Emergency Action & Coordination (DEMAC) ayaa sanadkii 2021 waxay cilmibaaris ku sheegtay in urrurada qurbajoogta ay dhexgaleen ururrada gudaha dalalkooda asalka ah ayna xiriir fiican la yeesheen ururro kala duwan si ay uga qaybqaataan horumarada ka socda gudaha dalka 6. Hay'addu waxay sidoo kale, xustay in ururrada qurbajoogtu ay waayeen taageero dhaqaale iyo mid shaqaale. Mararka qaar ururrada qurbajoogtu waxay ku tiirsan yihiin xiriir ay la samaysteen hay'addo caalami ah (INGOs), ururro heshiis ay la galeen ama dowladaha dalalka martigaliyay.

## 4. Dhinacyada Siyaasaddu Awoodda Saarayso

### 4.1. Maamulka

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga waa ilaaliyaha Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta. Waaxda Arrimaha Qurbajoogta ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayaa leh masuuliyadda ugu horaysa ee Fulinta, Kormeerka iyo Qiimaynta Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta. Daahfurnaanta iyo Islaxisaabtanku waa tiir muhiimad weyn u leh hirgalinta iyo taabbagalinta siyaasaddan, dhammaanna waa in laga wada qaybqaato in laga faa'iidaysto qurbajoogtu in ay gacan ka gaystaan horumarka dalka. Ayadoo la eegayo wadashaqaynta qurbajoogta Dowladda iyo saamilayda kale ee Dowladda iyo bulshada siyaasaddu dhinacyada ay awoodda saarayso ee ku xusan hoos waa kuwo dib loogu laaban karo lana hirgalin karo, sidoo kale siyaasadda waxaa ku cad sida ugu habboon ee la rajaynayo in guul looga gaaro hirgalinta siyaasadda.

Miisaaniyadda dhaqaale ee lagu maalgalinayo Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta waa in laga qoondeeyaa miisaaniyadda sanadlaha ah ee Dowladda Federalka Soomaaliya. Dowladda Soomaaliya waa in ay raadiso kaalmo dhaqaale oo lagu hirgaliyo Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta, ayadoo u sii maraysa bahwadaagteeda/deeqbixiyashaa caalamiga , ganacsatada iyo qurbajoogta qaar ka mid ah.

**4.2. Ka qaybqaadashada Qurbajoogta ganacsiga iyo Maalgashiga**

Dhaqaalaha Soomaaliya waa mid koraya xiriir adagna la leh ganacsiga adduunka iyo siyaasadaha maalgashiga xorta ah, taas oo soo jiidaysa maalgashata dibadda in ay maalgashadaan ganacsiga gudaha. Sidaas darteed, qaybta ugu mihiimsan ee dhaqaalaha waxa uu noqonaysaa beeraha iyo dhaqaalaynta xoolaha nool, dalagga ka soo go'a beeraha. Khayraadka beeraha ka soo xerooda waxaa lagu xisaabiyaa shan meelood saddex meel isdhaafsiga lacagaha qalaad ee dalka soo gala. Intaas waxaa dheer in kalluumaysiga, war isgaarsiinta, tamarta, warshadaha, tiknologiyadda, dhismayaasha, dalxiiska ay yihiin ilo dhaqaale oo muuqda. Dhammaan ilahan dhaqaale ee kala duwan waxay soo jiidan karaan maalgashatada. Dhaqaaluhu wuxuu ka soo kabtay hoos u dhac dhaqaale sanadkii 2020 halkaas oo koritaankiisa lagu qiyaasay 2.0% sanadkii 2021, arrintaana waxaa saamayn ku leh shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo dhoofinta xoolaha nool.

Sare u kaca heerka abaarta waxaa saamayn ku leh musiiboyin kala duwan oo ay ka mid yihiin; daadad, ayax, iyo caabuqa safmarka ah ee COVID 19. Ganacsiga gudaha waxaa sare u qaaday lacagaha xawiladaha lagu soo diro taas oo lagu qiyaasay 31.3% guud ahaan dakhliga dalka sanadkii 2021 halka ay ahayd 30.8% 2020. In la dhiso kalsoonida u dhaxaysa maalgashatada qurbajoogta iyo sidoo kale xasilloonida siyaasaddeed ee dalka waxay muhiim u tahay kororka maagashatada qurbajoogta ah ee dalka, iyadoo loo sii marayo istiraatijiyadaha hoos ku xusan.

1) In la abuuro guddi wadatashi oo qurbajoog ah in kor loo qaado xiriirka ka dhexeeya Dowladda Federalka iyo qurbajoogta Soomaaliyeed waxay muujinaysaa ka go'naan iyo wadashaqayn la la yeesho qurbajoogta. Muhiimadda koowaad ee guddiga waxay noqonaysa in qurbajoogtu wadashaqayn la yeeshaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Waaxda Arrimaha Qurbajoogta ayadoo loo sii marayo barnaamijyada iyo siyaasadaha lagula macaamilayo qurajoogta ee horumarinta Qaranka.

Guddiga qurbajoogtu waa in aysan ka badnaan 6 ilaa 8 xubnood kuwaas oo ka kooban waddamada waaweyn ee ay ku nool yihiin qurbajoogta Soomaaliyeed. Guddiga qurbajoogta sidoo kale waa in ay yeeshaan shir bille ah, ama saddexbiloodle ah.

2) In la siiyo qurbajoogta gunooyin lagu dhiirrigalinayo sida canshuur dhaaf alaabta iyo badeecadaha ay la soo degayaan taas oo noqon karta in lagu dhiirrigaliyo qurbajoogta si ay dalka u maalgashadaan.

3) Ilaalinta sharciyada degaanka si loo ilaaliyo maalgashiga qurbajoogta, sida daahfurnaanta, ganacsiga, iyo hoos- u- dhigidda khataraha ganacsiga soo wajihi kara.

4) Abuuridda ururro maalgaliya ganacsiyada yaryar, in la fududeeyo tabarrucaadda qurba joogta iyo maalgashiga ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe. Ganacsiyada yaryar waxay dhiirrigalinayaan hal-abuurka ganacsiga, sidoo kalana waxay awood siinayaan ganacsiyada gudaha si wax looga qabto saboolnimada waddama soo koraya. Arrintan waxaa tusaale u ah barnaamijka la dhaho **Haiti's Zafen Program,** barnaamijkaas oo ganacsiyo yaryar loogu abuuray 575 ganacsato yaryar kuna kacay qiimo lacageed oo dhan 1 Milyan oo doolar, sidoo kalana laga sameeyay 900 oo shaqa-abuur ah.

5) Waxaa la dhiirrigalinayaa danaynta qurbajoogta Soomaaliyeed ee dhinacyada sida beeraha iyo hal-abuurka ganacsiga, iyo iskaashiga u dhexeeya dowladda iyo qurbajoogta. Maalgalinta ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe waxaa abuuri kara Dowladda ayadoo maalgalinaysa, beeraha, ganacsiyo loo abuuro qurbajoogta. Xubnaha qurbajoogta waxay bah wadaag ganacsi la noqon karaan ganacsatada Soomaalida gudaha kuwaas oo hela; taageero ganacsi oo ay ku bilaabaan ganacsigooda, tababarro xirfadaha ganacsi, dabagalka iyo tababaridda xubanaha qurbajoogta.

6) In lagu dhiirrigaliyo hay'adaha ay khusayso si qurbajoogtu u maalgashato guryaha, miyiga iyo horumarada magaalooyinka.

### 4.3. Xogta iyo Warbixinta

Samaynta iyo hirgalinta Siyaasadda Qaran ee Qurbajoogta waxay u baahan tahay xog saxan oo waqtiga la socota. La'aanta xog saxan waxay caqabad ku noqon kartaa in qurbajoogta si hagaagsan loola macaamilo. Dowladdu waxay u baahnaan doontaa xog la isku hallayn karo oo waqtiga la socota si

loo ogaado, tirada, meelaha ay ku kala nool yihiin iyo khibradda dadka qurbajoogta ah, iyo sidoo kale, isbaddallada hayaanka joogta ah ee ay sameeyaan. Maadaama siyaasaddaan u baahan tahay fahan dheeraad ah iyo xaddi ballaaran, xogta iyo warbixinta siyaasaddu waa in ay ku salaysan tahay xaqiiqada qurbajoogta ee dalkooda rasmiga ah. Tusaale ahaan in la la macaamilo jiilka labaad ee qurbajoogta Soomaalida Minnesota waxay u baahan tahay in loo fududeeyo sidii ay ku soo gudbin lahaayeen xirfadooda, halka Soomaalida Qurbajoogta ah ee kuu nool waddamada iskaashiga golaha waddamada Gacanka Carbeed ay u badan tahay inay u baahan yihiin in ay isticmaalaan taageerada dowladda si ay u sameeyaan heshiisyo labageesood ah oo shaqa-abuur u ah dadkii soo hayaamay.

1) Isku darka warbixinada qurbajoogta. In la hagaajiyo helitaan xog saxan oo lagu helo waqtigeeda kuna saabsan qurbajoogta Soomaalida waxay kor u qaadaysa la macaamilka qurbajoogta. Dowladda waxay horumarin doontaa hirgalinna doontaa madal lagu kaydiyo xogta qurbajoogta. Madasha xogta ee la soo jeediyay waxay mudnaanta siin doontaa dhinacyada hoos ku xusan;

B. Tirakoobka Qurbajoogta, waxay muhiim u tahay in la abuuro istiratijiyado lagu ogaanayo qurbajoogta sida; jinsigooda, da'dooda, khibraddooda, baahiyahooda, mudnaantooda, iyo rabitaankooda in ay qayb ka qaataan horumarada Qaranka.

T. Xog kaydiyaha ururrada qurbajoogta iyo saamilayda ugu muhiimsan, taas waxay caawin doontaa la macaamilka qurbajoogta, baahinta xogohooda, iyo sii wadidda xiriirka socda ee u dhexeeya qurbajoogta iyo Dowladda. Xogaha iyo xiriirka tignolojiyadda casriga ah waxay hagaajin karaan xiriirka wanaagsan ee la la yeelanayo qurbajoogta, ayadoo la abuurayo madal dhinaca khadka ah oo gaar u ah qurbajoogta.

J. Khibradaha qurbajoogta, dowladda waxay qeexi doontaa meelaha ay khibradda fiican u leeyihiin qurbajoogtu kuwaas oo loogu baahan yahay in horumar degdeg ah looga gaaro sida; culuumta Ingineerinka, maamulka, tignolojiyadda, dhaqaalaha iyo kuwo kale oo la mid ah. Waxaa muhiim noqon doona in la horumariyo habab lagu aruurinayo looguna kuurgalayo xogta qurbajoogta.

X. In la soo koobo fursadaha maalgashi iyo kuwa ganacsi. Waxay muhiim u tahay dhinacyada dhaqaalaha, gobolada dalka ee la macaamila maalgashiga qurbajoogta. Waxaa muhiim ah sidoo kale, in hoosta laga

xarriiqo guulaha ay qurbajoogtu gaartay si ay dhiirrigalin ugu noqoto in ay ka qaybqaataan maalgashiga.

KH. Awoodda xoogga bini'adamka ee maamulka xogta, si loo sii wado warbixinta saxan ee qurbajoogta. Dowladdu waxay u baahan doontaa shaqaale wax qabad leh si uu u soo uruuriyo una kaydiyo xogta, sidoo kalana u casriyeeyo heliddda xogta la xiriirta qurbajoogta ee dad weynuhu heli karo.

D.Casriyeynta xogta si joogta ah ama si kalle ah waa waxa looga baahan yahay xiriir fiican oo la la yeesho qurbajoogta iyo hirgalinta siyaasadda.

R. Adeegsiga iyo soobandhiggidda sheekooyinka guulaha ay gaareen qurbajoogta Soomaalida ilaa inta laga helayo nidaamxogeed rasmi ah. kaas oo dowladdu ay ugu oggolaanayso xubnaha qurbajoogta in ay uga qaybqaataan horumarinta dalka ayagoo u sii maraya, khibraddooda, aqoontooda iyo waaya-aragnimadooda.

**4.4. BADBAADADA IYO AMNIGA**

Nabadgalyadu waa mudnaanta koowaad ee barnaamijka dawladdu ay ku aqoonsanayso saamaynta ay ku yeelanayso muwaadiniinta gudaha, qurbajoogta, iyo dhaqaalaha waxayna horumarinaysaa oo ay taageeri doontaa tallaabooyinka lagu horumarinayo amniga iyo badbaadada dadka , badeecadaha, iyo kaabayaasha iyadoo la raacayo awaamiirta siyaasadeed ee soo socota.

1) In la aqoonsado daneeyayaasha loo baahan yahay inay iska kaashadaan si loo horumariyo siyaasad badbaado iyo nabadgelyo Qaran, taas oo ku dhici karta heer degaan iyo qurbojoogba, iyadoo la qaadanayo hab loo wada dhan yahay oo la xiriira hawlgelinta daneeyayaasha.
2) In golaha la talinta qurbajoogta la gala doodo siyaasadda qodobka koowaad ee kor ku xusan daneeyayaal ahaan iyo sida ay saamayn ugu yeelanayso ka qaybqaadashadooda horumarinta qaranka.
3) In la sameeyo istaraatiijiyado la isku weydaarsado macluumaadka ku saabsan faldambiyeedka caalamiga ah dhammaan wasaaradaha ay khusayso, hay'adaha dowladgoboleedyada iyo sidoo kale saaxiibbada horumarinta caalamiga ah.

4) In la sameeyo heshiisyo labageesood ah kuwaas oo ku qotoma wanaajinta iyo ilaalinta xuquuqaha shaqaalaha soogalootiga Soomaaliyeed ee dibedda u soo hayaamay, lana tayeeyo dariiqyada ama marinnada socdaalka joogtada ah, si looga qaybqaato yaraynta tahriibka aan joogtada ahayn, ka hortagga tahriibinta dadka, iyo ka faa'iidaysiga ama adeegsiga shaqaalaha Soomaalida.
5) In la sameeyo barnaamijyo waxbarasho dadweyne oo ku saabsan arrimaha amniga, si looga caawiyo xubnaha qurbajoogta dib-u-dejinta iyo dib ugu soo celinta Soomaaliya.
6) Xoojinta sharciga si loo fududeeyo maalgashiga, oo ay ku jiraan dhaqangalinta xeerarkii hore iyo dambiyada khadka intarneetka, lacagaha la dhaqay iyo dambiyada kale ee maaliyadeed.
7) Dhaqangalinta tababaridda shaqaalaha ee barnaamijyada xafiisyada diblumaasiyiinta si loo caawiyo xubnaha qurbajoogta ah ee soo hayaamay ee ku sugan dalalka martida loo yahay, gaar ahaan kuwa nugul ee u baahan in laga caawiyo arrimaha badqabka ama badbaadada iyo ammaanka.

**4.5. MUDNAANSIINTA HAWEENKA**

Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) wuxuu xoogga saarayaa ujeeddooyinka barnaamijka ee diiradda saaraya kooxaha bulshada nugul iyo kuwa danyarta ah, iyadoo fiiro gaar ah looga baahan yahay awoodsiinta haweenka iyo gabdhaha. Maaddaama Dawladdu ay ku dadaalayso in ay samayso go'aanno siyaasadeed oo xog-ogaal ah oo laga soo xigtay xogta la kala saaray ee haweenka (gender-disaggregated data), arrimaha xasaasiga ah ee haweenka ee maamulka wuxuu u baahan yahay in kor looga qaado dhammaan dhinacyada jiritaanka Qaranka. Marka loo eego heer caalami, haweenka soogalootiga ah ayaa ah qabanqaabiyeyaasha bulshada ee muhiimka ah waxayna soo diraan lacago heer ahaan la mid ah tan hayaamayasha ragga ah inkasta oo ay helaan lacag yar. Lacagaha ay soo diraan inta badan waa kuwo soo noqnoqda muddo dheer. Marka la eego muhiimadda ay ku dhex leeyihiin bulshooyinka ay martida u yihiin, tixgalinta haweenka ayaa haddaba, muhiim u ah guusha siyaasadda qurbajoogta.

1. In lagu daro Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka siyaasad dejinta dheeraadka ah ee Qurbajoogta.

a). Wasaaraddu sidoo kale waa in ay hubisaa hirgelinta siyaasadaha xasaasiga ah ee haweenka iyo ka qaybgalka la xiriirka qurbajoogta.

b). Wasaaraddu waxay xaqiijin doontaa go'aan gaarista loo dhan yahay ee la xiriirta siyaasad sameynta.

2. In la hubiyo lana iswaafajiyo siyaasadda iyo la xiriirka qurbajoogta, shaqooyinka tirakoobka iyo barnaamijyada u gaarka ah qurbajoogta oo wata mabaadi'da sinnaanta labka iyo dhedigga ee lagu qeexay Qorshaha Horumarinta Qaranka, iyo sidoo kale Axdiga Haweenka Soomaaliyeed.
3. In si macno leh loola xiriiro ururrada haweenka ee qurbajoogta ah, isku xirka haweenka ayaa udubdhexaad u ah ururrada qurbajoogta iyada oo loo marayo kooxaha dhaqanka iyo diinta, iyo sidoo kale ururrada samafalka, kuwaas oo ka kooban adeegyada sharciga ilaa adeegyada istaageeridda sida taageeridda tacsida marka ay bulshada qayb ka mid ah ku timaado. Waa muhiim in ururradan lagu daro siyaasadaha axdiga haweenka si hagaagsanna ay uga qaybqaataan qurbajoogtu.
4. In la horumariyo lana fududeeyo barnaamijyo gaar u ah haweenka, gaar ahaan kuwa ku saabsan tababarka farsamada, taageerada horumarinta bulshada, maalgelinta ganacsiga yaryar ee hal-abuurka haweenka, iyo adeegyada bulshada sida caafimaadka.
5. In laga faa'iidaysto ururrada haweenka qurbaha si kor loogu qaado horumarinta haweenka ee doorka hogaaminta, iyo sidii ay uga mid noqon lahaayeen uguna soo biiri lahaayeen miiska go'aan qaadashada ee golayaasha qaranka, taas oo muujinaysa ka go'naanta doorkooda Qorshaha Horumarinta Qaranka.
6. In la sameeyo barnaamijyo iskaashi iyo hagitaan u dhexeeya ururrada haweenka Soomaaliyeed ee gudaha iyo ururrada haweenka qurbaha, si kor loogu qaado awoodsiinta haweenka iyo xoojinta ururrada haweenka wax soo saara iyo ganacsiyadooda.
7. Xoojinta awoodda Waaxda Qurbajoogta ee falanqaynta axdiga haweenka iyo aaladaha loo isticmaalo kobcinta dhiiragalinta haweenka.

### 4.6. Dhallinyarada

Dhalinyaradu waxay ka mid tahay kuna qoran tahay Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) ee Soomaaliya inay tahay koox muhiim ah oo nugul, oo ay sidoo kale ka mid tahay dadka reer miyiga ah, haweenka, iyo dadka gudaha ku barakacay. Qurbajoogta ayaa ah kuwo is bedelaya, iyadoo tirada dadka Soomaaliyeed iyo kuwa ku dhashay meel ka baxsan Soomaaliya ay sii kordhayaan. Siyaasadaha iyo barnaamijyada qurbajoogta u gaarka ah

dhallinyaradu waa in ay wax ka qabtaan laba qaybood oo muhiim u ah horumarinta Qaranka. kow: ballaarinta fursadaha dhaqaale bulsheed ee ay heli karaan dhallinyarada gudaha iyada loo marayo qurbajoogta, iyo ilaalinta xiriirka dhallinyarada ee dalkooda asalka ah ee Soomaaliya. Istiraatijiyadaha waxaa ka mida;

1. In la abuuro qaabkii ay dawladdu kula shaqayn lahayd dhalinyarada qurbajoogta ah.
2. In si macno leh loo la xiriiro ururrada dhallinyarada ee qurbajoogta. Ururrada ardayda Soomaaliyeed waxaa laga helaa machadyada dugsiga sare ka dambeeya oo ay deggan tahay qurbajoogtu. Marka laga soo tago ururradan, ardayda Soomaaliyeed waxay uga qaybgalaan nolosha ardayda iyagoo adeegsanaya diin, aragtida midnimada Afrika (Pan Africanism), iskaa wax-u-qabso, iyo ururrada ardayda xuquuqda madaniga ah. La shaqaynta kooxahan waxay ka caawin kartaa dhinacyada kale ee siyaasadda sida gudbinta raasamaal bini'aadameed, iyo sidoo kale isdhexgalka iyo soo noqoshada dalka ee qurbajoogta.
3. In la sameeyo hindisayaal lagu xiriirinayo laguna abaabulo da'yarta Soomaaliyeed ee gudaha shabakadaha qurbajoogta si loo hubiyo waxqabadka dhallinyarada qurbajoogta ah mustaqbalka fog, tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay maadaama jiilasha qurbajoogta ahi ay noqon doonaan kuwo aan ku mashquulin waddankii ay asal ahaan ka soo jeedeen.
4. In la abuuro barnaamijyo isku xira dhallinyarada qurbajoogta ah iyo kuwa Soomaaliya jooga gaar ahaan barnaamijyo ku salaysan la talinta, tababaridda, iyo iskuxirka xirfadlayaasha dhallinyarada ah.
5. In la horumariyo waxsoo saarka dalxiiska iyo barnaamijyo dhaqameed si gaar ah loogu talagalay dhallinyarada gudaha iyo kuwa qurbaha.
6. In laga faa'ideysto baraha bulshada si kor loogu qaado dedaallada socda ee lagu hirgelinayo siyaasadda qurbajoogta.
7. Ka qayba galka kubadda cagta, barnaamijyada hormarinta ciyaaraha, maalgashiga iyo nabad dhisidda in ay noqdaan madal ay ka qayb galaan dhallinyaradu, dowladduna aqoonsan tahay.

### 4.7. Dalxiiska iyo Dhaqanka

Hilowga qurbajoogta ee dalkooda ayaa door muhiim ah ka ciyaara dalxiiska adduunka oo dhan iyadoo dalxiisayaasha qurbajoogtu ay guud ahaan aad u xiiseeyaan waxsoosaarka, adeegyada iyo degamada gudaha marka ay booqanayaan dalkooda hooyo. Intaa waxa dheer, astaanta qaranku waxa ay

noqotay mid aad u baahsan, abuurta oo kor u qaadaysa muuqaal gaar ah iyo sumcad caalami ah oo u adeegaysa danta qaranka.

Runtii, wadamadu waxa ay dib u qaabaynayaan aqoonsigooda qaran iyaga oo tartan caalami ah ugu jira dalxiiska iyo maalgashiga gudaha.

Qurba joogta Soomaaliyeed waxay sidoo kale danaynayaan inay maalgashadaan suuqyada/adeegyada dalxiiska iyo dhaqanka si ay fursad u siiyaan dowladda inay ka faa'iideysato fursaddan. Mid ka mid ah siyaabaha ugu awoodda badan ee isku xirka madaxa iyo wadnaha xubnaha qurbajoogta waa booqashooyinka dalka hooyo. Waddamada adduunku hadda waxay qurbojoogtooda ku martiqaadayaan shirar ay dib ugu soo laabanayaan waddankii hooyo, iyaga oo kor u qaadaya booqashooyin habaysan oo waddankoodu ugu talagalay jiilka soo socda iyo soo jiidashada dalxiiska qurbajoogta.

Dawladdu waxay abuuri doontaa barnaamijyo gaar ah oo loogu talagalay dalxiiska iyo dhaqanka Qurbajoogta

1) Samaynta barnaamijyo iyo dhiirrigelin ururrada qurbajoogta ah iyo ergada diblumaasiyadeed ee waddamada loo aadayo si kor loogu qaado fursadaha dalxiiska Soomaaliyeed gaar ahaan soo bandhigidda fanka iyo dhaqanka Soomaaliyeed, iyo sidoo kale baridda luqadaha.
2) In la sameeyo barnaamij waxbarasho oo lagu casuumayo xubnaha qurbajoogta Soomaaliyeed ee jiilka labaad iyo saddexaad inay yimaadaan Soomaaliya, si ay wax uga bartaan hiddahooda, bulshadooda, iyo xiriirka dalkooda. Tani waxay sidoo kale dhiirrigelinaysaa dhallinyaradu inay qaadato door firfircoon si ay u horumariso dalka hooyo. Waxaa isa soo taraya tirada dhallinyarada qurbaha ee u safra dalalkii ay ka soo jeedeen si ay jawaab ugu helaan aqoonsigooda iyo rajada ay ka qabaan in ay ku xirmaan dalkooda asalka ah. Qaar badan ayaa u arka waxbarashada, shaqada iyo barnaamijyada iskaa-wax-u-qabso ee dibadda fursado ay ku abuuraan xiriir dhaqan, fahan fiicanna ay uga qaataan meeshii ay asal ahaan ka yimaadeen ayaga iyo qoysaskooda. Daraasad uu sameeyay 2010 machadka siyaasadda socdaalka ayaa lagu ogaaday in gudaha Mareykanka, soo galootiga ay 46% uga dhowdahay inay si mutadawacnimo ah ugu shaqaystaan caalamka marka loo eego muwaadiniinta Maraykanka u dhashay. Ku

dhawaad hal milyan oo Maraykan ah oo si iskaa wax-u -qabso ah uga shaqeeya dibadda sannadkii, ku dhawaad 200,000 oo ka mida ayaa ah soogalootiga jiilka koowaad iyo labaad. Tusaale ahaan, Dhalashada Israa'iil waa ururka dalxiiska waxbarasho ee ugu weyn adduunka kaas oo siiyay in ka badan 800,000 safarro dhallinyarada qaangaarka ah ee Yuhuudda inta u dhaxaysa da'da 18-26 sanadkii.

3) In qurbajoogta loo soo bandhigo isdhaafsi barnaamijyo waxbarasho,ciyaar iyo dhaqan.
4) In la kordhiyo xiriirka ka dhexeeya wax soosaarka dhaqanka iyo dalxiiska Soomaaliya iyada oo loo marayo hoteellada iyo dalxiisayaasha, gaar ahaan iyadoo lala kaashanayo hay'adaha dhaqanka iyo dalxiiska ee Soomaaliya.
5) In la sameeyo barnaamijka Danjirayaasha Dalxiiska iyo Dhaqanka iyadoo laga faa'iidaysanayo xirfadaha, khibradaha iyo raasamaalka laga helayo qurbaha.
6) Kor u qaadidda dalxiiska degaanka si loo fududeeyo loona hirgaliyo ayadoo loo sii marayo barnaamijyada dhiirrigalinta ganacsiga.
7) Hirgelinta iyo taageeridda hindisayaasha ka hortagga dembiyada iyo dhimista si loo xaqiijiyo badbaadada iyo ammaanka dadka soo booqda dalka, oo ay ku jiraan qurbajoogta booqanaysa ama dib ugu soo laabtay Soomaaliya.

## 4.8. ISDHEXGALKA IYO KU SOO NOQOSHADA DALKA

Tiirarka asaasiga ah ee istaraatijiyadaha qurbajoogta caalamka waa in la dhiirrigeliyo ku noqoshada ku meel gaarka ah ama joogtada ah ee dalkii hooyo. laakiin gaar ahaan halka dalka dib-ugu-laabashada ay joogto tahay waxa muhiim ah in la fududeeyo oo la taageero dib ugu soo laabashada waddankii asalka ahaa. Intaa waxaa dheer, waxaa la xusay in ay jiraan daldaloollo dhinaca taageerada dadka soo laabtay inta lagu jiro dib-u-celinta - khasabka ah ee waddankoodii hooyo. Taageerada waxa bixiya dalka martida loo yahay si loo fududeeyo bixitaanka, laakiin taageerooyinka sida la talinta is dhexgalka, gargaarka caafimaadka dhimirka, si qurbajoogtu ugu noqoto dalkoodii asalka ahaa kuma filna. Tani waxay si gaar ah u khusaysaa dadka lagu xiray dalka ay martida u yihiin ee si qasab ahna lagu soo celiyay. Waxaa intaa dheer, waxaa jira caqabad ay la kulmeen dadka soo laabtay, taas oo ay ugu wacan tahay

sinnaan la'aanta awoodda ee laga dareemay dhinaca dadka deegaanka. Iyadoo la og yahay in guud ahaan caafimaadka iyo fayoobaanta xubnaha qurbajoogta ah ee soo laabanaya ay saameyn ku leedahay caafimaadkooda jireed iyo bulsho ahaaneed oo ay weheliso caafimaadka shucuureed iyo maskaxeed. Helitaanka xog taageeraysa adeegyada dalka waxay muhiim u tahay qurbajoogta si ay isku dhexgalaan bulshada ay ka soo jeedaan.

Dawladdu waxay qaadi doontaa tillaabooyinka soo socoda iyadoo la kaashanaysa bahwadaagteeda:

1. In la sameeyo barnaamijyo lagu dhexgelinayo dadka ku soo laabanaya gudaha dalka iyo bulshada gudaha. In la sameeyo wadashaqeyn dhexmarta wasaaradaha iyo xarumaha qurbajoogta halkaas oo dadka soo laabanaya (foggaan-arag ahaan iyo xarun ahaanba) ay ka heli karaan macluumaadka lagama maarmaanka ah ama kaalmo wax ku ool ah oo ku saabsan hababka is dhexgalka bulshada.
2. In la siiyo barnaamijyo isdhexgalka dadka lagu khasbay inay dalka ku soo laabtaan, sida la talinta is dhexgalka, kaalmada caafimaadka dhimirka, iyo barnaamijyo tababar.
3. In la siiyo kalfadhiyo hanuunin ah oo loogu talagalay dadka soo laabtay si looga hortago caqabadaha ganacsigooda, iyo sidoo kale dhaleecaynta qurbajoogta laga sheego.
4. Abaabulka munaasabado si looga caawiyo dadka soo laabanaya inay degaan. Dhacdooyinkani waxay sidoo kale bixin doonaan fursado isku xiran oo qiimo leh.
5. Iskudubarridka iskaashiga guud iyo kuwa gaarka ah ee hay'adaha qurbajoogta si loo fududeeyo is dhexgalka Soomaalida soo laabanaysa iyo kuwa la soo celinayo taas oo ay fulinteeda leedahay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

### 4.9. CAAFIMAADKA

Dowladda Soomaaliya ayaa u aqoonsatay daryeelka caafimaadka aasaasiga ah in uu yahay habka ugu muhiimsan ee lagu wanaajinayo natiijooyinka caafimaadka, iyadoo daryeelka caafimaadka guud ahaan iyo midka caalamiga ah uu yahay hadafka Dowladda. Qurbajoogta ayaa horay u ahaa xubin muhiim u ah caafimaadka Soomaaliya, iyagoo gacan ka gaysta horumarinta siyaasadda, bixinta adeegyada caafimaadka ee dadka nugul, waxaana ugu dambeeyay, in qurbajoogtu ka qaybqaadatay wajiyada kala

duwan ee wax ka qabashada cudurka COVID-19. Barnaamijyada xiriirka qurba joogta waa in ay dhisaan oo ay ballaariyaan doorka jira ee Soomaalida dibaddu ay ka ciyaaraan caafimaadka.

1. In lala shaqeeyo kooxaha qurbajoogta iyo khubarada si loo hubiyo in macluumaadka caafimaadka la heli karo, dhaqan ahaan, lab iyo dhedig iyo da' ahaanba, loona qaabeeyay si ay muwaadiniintu u fahmaan. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka bulshada sida COVID-19 iyo kooxaha nugul (haweenka, dhalinyarada, bulshooyinka reer miyiga) kuwaas oo la tacaalaya helid la'aan adeeg caafimaad oo ku filan .
2. In laga caawiyo ururrada iyo shabakadaha qurbajoogta adeegyada caafimaadka iyo deeqaha qalabka caafimaadka ee muhiimka ah. Ka saaridda caqabadaha sharciyeynta si loo kordhiyo ka jawaabista baahiyaha caafimaad ee deegaanka.
3. In la fududeeyo iskuxirka golayaasha siyaasadda iyo xirfadlayaasha caafimaadka ee qurba joogta Soomaaliyeed.
4. Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay awood u yeelataa bulshada qurbajoogta ah iyo ururrada diinta si loo xaqiijiyo helitaanka qaadashada tallaalka dadkaas  Wadamada asal ahaan ka soo jeedaan qurba joogtu sida Soomaaliya waa in ay aqoonsadaan doorka muhiimka ah ee qurbajoogta iyo hagaagsanaanta muwaadiniintooda.
5. In la sameeyo barnaamijyo aqoonkororsi ah oo lagu xoojinayo taageerada daryeelka caafimaadka si loo taageero qurbajoogta shaqada ugu soo hayaantay waddamada kale. Hawlwadeennada diblamaasiyaddu waa inay awoodaan inay bixiyaan xogta caafimaad ee maskax ahaan, jinsi ahaan iyo taran ahaan ee haweenka soo hayaamay sida waddamada Golaha Iskaashiga Gacanka Carbeed (GCC).




*Jaantuska 2aad* waddamada marti galiya aqoonyahanka qurba joogta waxay ka qayb qaataan barnaamijyada lagu hormarinayo qurba joogta Afrika, waddama kale ee aqoonyahanka Qurba joogta waxaa ka mida; Norway, Germany, Belgium, Ethiopia, Uganda iyo New Zealand.

Xogta IOM

Dhakhaatiirta Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool ayaa Soomaaliya la wadaagay khibraddooda iyo aqoontooda ku saabsan tignoolajiyadda casriga ah iyo habraacyada ilaalinta COVID-19. Waxa ay khadka ka sameeyeen xiisado tababar si kor loogu qaado tayada shaqaalaha maxalliga ah ee isbitaalada guud iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Dhaqaatiirtu waxa ay ballan qaadeen in ay bixinayaan kharashaadka xarumaha caafimaadka ee guurguura si ay u gaaraan meelaha fog fog. Intaa waxaa dheer, qurbojoogtu waxay sii wadaan taageerada waaxda caafimaadka ee Soomaaliya iyagoo u maraya barnaamijyo sida **Barnaamijka Horumarinta Qurbajoogta Afrika** ee hay'adda Socdaalka Adduunka (IOM MIDA). Barnaamijka MIDA ee Soomaaliya waxa uu hubinayaa in xirfadaha iyo aqoonta lagu wareejiyo hay'adaha martida loo yahay oo ay sii hayaan shaqaalaha qaranku marka ay khubarada qurbajoogtu dhammeeyaan hawlahooda. Saamaynta muddada dheer iyo sii jiritaanku waa la sii xoojiyaa iyada oo loo marayo shaqooyinka xirfadlayaasha maxalliga ah iyo kuwa yaryar, kuwaas oo ka faa'iideysanaya la talinta iyo tababarka maalin laha ah ee khubarada qurbajoogta. Qurbajoogta Soomaaliyeed ayaa laga kala keenay dalal dhowr ah sida ku cad sawirka 2aad.

**4.10. Waxbarashada**

Waxbarashadu sidoo kale waa qayb muhiim u ah horumarinta qaranka halka qurbajoogtu ay ku hawlan yihiin dhaqan ahaan. Qorshaha Horumarinta Qaranka ayaa qeexay in xoojinta maamulka nidaamka waxbarashada Soomaaliya, tayada hay'adaha Wasaaradda, guddiyada waxbarashada, iyo u hoggaansanaanta shuruucda hay'adaha gaarka ah ay leeyihiin mudnaan gaar ah. Istiraatijiyadda ama xeeladaha la macaamilka qurbajoogta waxaa ka mid ah;


1. In kooxaha qurbajoogta ay ka qaybqaataan hindisayaasha dawladda ee Qorshaha Hormarinta Qaranka (NDP) ee loogu talagalay dadka aadka u nugul heerka diiwaangelinta hoose ee dugsiyada hoose/dhexe iyo sare, gaar ahaan gabdhaha iyo dadka meelaha miyiga ah jooga iyo sidoo kale kaabayaasha dugsiyada, iyo nadaafadda.
2. In la abuuro barnaamijyo tababar oo la la kaashanayo saaxiibbada bahwadaagta caalamiga ah ee qurbajoogta korna loogu qaado xirfadaha macallimiinta heer kasta dugsiyada, gaar ahaan macallimiinta haweenka si kor loogu qaado tirada haweenka iska diiwaangalinaya dugsiyada.
3. Fududaynta fursadaha iskuxirka iyo madasha siyaasadeed ee xubnaha qurbajoogta ee xagga tacliinta, maamulka waxbarashada, tababarrada

xirfadaha iyo hay'adaha shaqaalaysiinta si ay uga faa'iidaystaan dhinaca waxbarashada.

4. In la iswaafajiyo habaynta barnaamijyada haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka qaba iyo barnaamijyada dhallinyarada ee ka soo baxaya siyaasaddan ka qaybgalka qurbajoogta iyo dhinacyada waxbarashada.

**5. GABAGABO**

**a. MUDNAANTA SIYAASADDA MUDDADA GAABAN**



**5.1.1 Samaynta iyo Xoojinta Xiriirka Qurbajoogta**

Marxaladda ugu horreysa ee hirgelinta siyaasaddan, Dowladda Federalka Soomaaliya waxay xoogga saari doontaa horumarinta xiriirka iyo iskaashiga bulsho weynta Soomaaliyeed ee qurbaha. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in dhidibada loo aaso ka qaybgalka wanaagsan ee qurbajoogta, dhinacyada kala duwan, si loo gaaro himilooyinka mustaqbalka fog ee siyaasaddan.



**5.1.2 Qeexidda Shabakadaha, Kooxaha iyo Ururrada**

Mid ka mid ah hawlaha ugu muhiimsan ee siyaasaddan waxaa ka mid ah samaynta khariidad dhammaystiran si loo helo shabakadaha qurbjoogta ah ee jira, oo ay ku jiraan xirfadlayaasha, haweenka, dhallinyarada, kooxaha iyo ururrada kale ee la aasaasay. Mudnaanta ayaa la siin doonaa samaynta diiwaangalinta hay'adahan.



**5.1.3 Istaraatiijiyad Isgaarsiineed oo Wax-ku-ool ah**

Dowladda Federalka Soomaaliya waxay qiimayn ku samayn doontaa habab is gaarsiineed oo kaladuwan oo jira si ay awood ugu yeelato isdhexgalka bulsho weynta Soomaaliyeed ee qurbajoogta ah iyo inay go'aamiso hannaanka ugu habboon ee

lagu gaari karo dadka dhagaystayasha ah. Qiimayn taxaddar leh ayaa lagu xisaabtami doonaa.



**5.1.4 Qeexidda Qaybaha Muhiimka ah ee Iskaashiga**

Marka la eego awoodda ay u leeyihiin bulshada qurbajoogta ah in ay fuliyaan qaabdhismeed sax ah, Dowladda Federalka Soomaaliya waxay si taxaddar leh u xulan doontaa meelaha muhiimka ah ee Qorshaha Horumarinta Qaranka si ay si istiraatijiyad ahna ula falgalaan qurbajoogta oo ay sare ugu qaadaan waxqabadkooda.



**5.1.5 Baahinta Siyaasadda**

Si loo ilaaliyo waxyaabaha siyaasaddu khusayso Dowladda Federalka Soomaaliya waxay u sahlaysaa qurbajoogta iyo waaxyaha dowladda inay:

a). ka warqabaan jiritaanka siyaasaddan

b) Si joogto ah ula socdaan sidii loo hirgelin lahaa,

loona gaaro dadka loogu talagalay, siyaasaddani waxay u baahan tahay in kor loo qaado.

**5.2 MUDNAANTA SIYAASADDA MUDDADA DHEER**

**5.2.1 Maalgashiga Tooska ah ee Qurbajoogta**

Haddii si wanaagsan loo abaabulo, maalgashiga qurbajoogtu waxa ay u adeegi karaan dib-u-cusboonaysiinta iyo soo kabashada Soomaaliya. Qurbajoogta ku nool dalalka ay martida u yihiin waa in lala socodsiiyaa fursadaha maalgashi ee Soomaaliya ayadoo loo sii marayo safaaradaha dalku ku leeyahay dibadda. Si loo horumariyo maalgashiga qurbajoogta ee fudud, Dowladda Federalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah waxay hubin doonaan inay jiraan habab saaxiibtinimo. Fikradda ay soo jeediyeen qaar ka mid ah dowladgoboleedyadu ayaa ah in, xaaladaha qaarkood, ay u dhaqmaan sidii deeqbixiye.

Marka qof qurbojoog ahi uu maalgalin ka sameeyo dowladgoboleedyada, waa la soo dhawaynayaa waxayna dhiirrigelin doontaa qaar badan inay ku soo biiraan.

### 5.2.2 Hababka Isgaarsiinta

Qodobkani waxa uu lamahuraan u yahay ka dhigidda siyaasadda mid shaqaynaysa. Abuuritaanka iyo naqshadaynta madal ku habboonna waa lagamamaarmaan. Inkasta oo ay caddahay in baraha bulshada laga faa'iidaysan karo, haddana Dowladda Federalka Soomaaliya waxay yeelanaysaa hab u gaar ah oo ay kula xiriirto qurbajoogta. sameeyayasha siyaasaddan waxay ku taliyeen in la dhiso hab isgaarsiin qurbojoogtu leedahay oo kumeelgaar ah kaas oo la mid ah mareegaha MFA si loo sii wado dardargelinta. Si xogta looga dhigo mid la heli karo, Dowladda Federalka Soomaaliya waxa ay qorshaynaysaa in ay dhisto xog uruurin iyo kaabayaal xog ururin.

### 5.2.3 Gudbinta Waxbarashada

Arrintani waa qayb muhiim ah oo ka mid ah siyaasadda, sababta oo ah waxaa jira qurbojoog Soomaaliyeed oo aqoon leh oo ku nool dibadda. DFS waxay xoogga saari doontaa sidii qurbajoogta Soomaaliyeed ee wax bartay loogu fududayn lahaa inay aqoontooda u gudbiyaan dadka kale ee Soomaaliyeed ee u baahan. Xataa barayaasha shaqada ka fariistay DFS waxay siin doontaa dhiirigelin iyo taageero ay ku yimaadaan Soomaaliya xataa waqti kooban. Xogta la qorsheeyay ayaa sidoo kale la socon doonta aqoonyahannada, taas oo u sahlaysa DFS inay la jaanqaado aqoon yahanada jooga iyo baahiyaha jira. DFS waxay ku boorrin doontaa Safaaradaha inay la xiriiraan qurbajoogta Soomaaliyeed ee wax bartay, kuna dhiirrigeliso inay caawiyaan Soomaalida u baahan aqoontooda.

### 5.2.4 Gudbinta Xirfadda

Xirfadda gudbintu waa hab si weyn loo aqoonsan yahay oo wax looga qabanayo baahida xirfadeed ee ka jirta waddan sida Soomaaliya oo kale ah oo baahi weyn loo qabo xirfado gaar ah. Iyada oo loo marayo siyaasaddan, DFS iyo qaar ka mid ah dowladaha xubnaha ka ah ayaa dhiirrigelin u fidiyay qof kasta oo qurbajoog Soomaaliyeed ah oo bixiya tababarro xirfadeed haba yaraatee. Dhallinyarada shaqo la'aanta ah ayaa sida ugu badan uga faa'iidaysan doona qorshayaasha gudbinta xirfadda, FGS iyo FMS waxay hubin doonaan hagaajinta qalabka si ay si habsamida leh ugu fududeeyan hindisahan. Tusaale ahaan, muddada wadatashiga siyaasaddan, dowladgoboleedyada qaarkood waxay si cad u sheegeen dhiirrigelinta ay dowladgoboleedyadu siin doonaan qof kasta oo tababara dhallinyaradooda aan xirfadda lahayn iyo kuwa shaqo la'aanta ah.

### 5.2.5 Ganacsiga iyo Dalxiiska.

Soomaaliya waxaa si cad uga jira goobo ku wanaagsan dalxiiska inkasta oo ay jirto xaalad amni. Siyaasaddani waxay dhiirrigelinaysaa qurbajoogta Soomaaliyeed inay soo booqdaan Soomaaliya. Dadka qaar ee qurbaha ka yimid ayaa laga yaabaa inay u safraan Soomaaliya marka ay hal kaas ka dhacayaan ay halkaas ka dhacayaan munaasabado dhaqameedyo guud . Qurbajoogta Soomaaliyeed waxay u shaqayn karaan sidii danjirayaal awood leh waxayna u abuuri karaan Soomaaliya fursado waaweyn iyagoo ka qayb galaya bandhigyada ganacsi ee dalalka ay martida u yihiin iyo, marka ay ku habboon tahay in ay kor u qaadaan badeecadaha Soomaaliya. Jaaliyadaha Soomaalida ee qurbajoogta ah ee is abaabulay waxay awoodaan inay guulo fiican gaaran sida laga arkay dalalka Hindiya, Israa'iil, Marooko, iyo Ruwaanda oo hirgaliyay siyaasaddooda qurba joogta.